



Ogaysiiska U doodista Bulshada iyo Xaquuqda Dhibanaha fal Danbiyeedka ee Shaqaalaha

Xeerka Ka difaacida Shaqaalaha Hudheelka Dhibaateynta Ama Rabshada (Protecting Hotel Employees from Harassing or Violent Conduct Ordinance), Sharciga Maamulka Magaalada Seattle (SMC, Seattle Municipal Code) 14.26, wuxuu ka doonayaa loo shaqeeyaasha hudheelka iyo kuwa adeegga siiya hudheelada inay ogaysiisnaan siiyaan shaqaalaha uu quseeyo kuwaasoo ka badbaaday rabshad ama fal dhibaateyn ah oo uu u gaysteen martida hudheelku.

Haddii aad tahay qof ka badbaaday fal rabshad ah ama dhibaateyn ah oo uu kuu gaystay martida hudheelku waxaad xaq u leedahay arimaha soo socda:

- 1) *Qof xaquuqda bulshada U dooda*, Dooroka u doodaha xaquuqda bulshada waa inuu ku siiyo adeegyada talo bixinta qarsoodiga ah ee billaashka ah saacadaad doonto oo maalinta kamid ah dhammaan maalmaha asbuuca. U doodaha bulshada ayaa adeegyada soo socda ee taageerada bixinaaya: a) wuxuu kuu sharaxayaa xaquuqdaada ku cad xeerka SMC 14.26 iyo dookhyada kuu furan ee aad qaadi karto markaad dacwad gudbinayso; b) wuxuu ku siinayaa adeegyada gudbinta si aad u buuxiso baahiyahaaga shaqsigaa ah; iyo c) wuxuu kaa caawinayaa soo sheegida dhacdo rabshad ah ama dhibaateyn ah oo uu gaystay marti jooga hudheelka, haddii aad doorato sidaas. Helitaankaaga adeegyadaan maaha shardi ku xiran soo sheegida dhacdada fal xun oo uu gaystay qof marti ah; waxaad kaliya adeegyadaan ku heli kartaa si aad u qiimayso dookhyada kuu furan.

Magaalada Seattle ayaa dhistay King County Sexual Assault Resource Center (KCSARC), ururka u dooda dadka dhibanayaasha ah ee bixiya laynka 24 saac shaqeeya, si aad uga hesho adeegyadaan. Waxaad wici kartaa KCSARC si aad u hesho adeegyada qarsoodiga ah adoo wacaaya: 1-888-99-VOICE (1-888-998-6423). Si aad xog badan uga ogaato KCSARC, fadlan booqo: <https://www.kcsarc.org/>.

- 2) *U doodaha Dhibanaha Fal danbiyeedka iyo Xaquuqaha kale ee ku cad RCW 7.69.030*. Sida ku cad Xeerka Wax laga Badalay ee Washington (RCW, Revised Code of Washington) 7.69.030, dhibanayaasha fal danbiyeedka waxaa la siiyaa xaquuqo kala duwan kaasoo quseeya Maxkamada dabiyada ama dacwadaha maxkamada carruurta. Haddii aad tahay qof loo gaystay rabshad ama danbiyada galmada, waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo talo bixiye dhibanaha fal danbiyeedka kaasoo la jooga marka laga qaadaayo waraysiyada dacwada ama isdifaaca. Dooroka u doodaha dhibanaha fal danbiyeedku waa inuu ku siiyo taageero dareen. Sida ku cad RCW 7.69.030, waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad hesho caawimaad caafimaad oo degdeg ah ayadoon bilaab sabab dib loo dhigayn iyo inaad hesho qof soo faragaliya shirkada aad u shaqayso, hadday muhiim tahay, si loo yareeyo khasaarada mushaarka sabab la xariirta inaad maxkamad tagtay. Ka fiiri RCW 7.69.030 wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan xaquuqaha ay leeyihiin dadka soo maray fal danbiyeedyada.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada difaacada dhibanaha fal danbiyeedka, waxaad la xariiri kartaa: Victim Support Services 1-888-288-9221 ama KCSARC oo aad ka wacayso 1-888-998-6423.

- 3) *Habraaca Weerarka ee Gaarka ah ee Degmada King (King County Special Assault Protocol)* Habraacu wuxuu bixinayaa tilmaamo ku aadan baaritaano wadajir ah iyo adeegyo haddii ay la xariiraan fal danbiyeedyo gaar ah oo dhacay Degmada King. Ayadoo lagu saleeyay si waafaqsan RCW 26.44.180 iyo RCW 26.44.185, habraaca waxaa loo sameeyay in lagu hormariyo hufnaanta baaritaannada, lagu difaaco masaaliixda dhibanayaasha, eedaynayaasha, iyo bulshooyinka, laguna xaqiijino inay heli karaan adeegyada muhiimka u ah dadka dhibanayaasha ah iyo qoysaskooda.

Shirkadaha iyo shaqaalaha su'alaha ka qaba foomkaan waxay la xariiri karaan Xafiiska Heerarka Shaqaalaha (OLS, Office of Labor Standards) oo laga heli karo 206-256-5297 ama waxay booqan karaa webseetka OLS oo ah <http://www.seattle.gov/laborstandards>.